Kusoo dhawoow " Caruurta leh qalalka" Qaybta neerfaha caruurta

Ilmahaaga waa in la dhigaa xarunta inta uu buko: MAGACA

Waxaad ka heli kartaa halkan warbixin la xidhiidha bukaanka:
http://www.filadelfia.dk/epilepsihospitalet/boern/patientinformation

Qaybtan waxaa loogu talagalay bukaanka da'doodu tahay 0 - 18 baaritaankooda, ogaanshaha cudurkooda iyo ka dawaynta qalalka. Inta ay ku jiraan qaybta, caruurta waxay la kulmayaan shaqaalaha kala duwan ee qaybta, sida kalkaaliyaasha, dhakhaatiirta, saaykoolajiyaasta, la taliyaasha bukaanka, daaweeyayaasha jimicsiga iyo kuwa ku takhususay xaga quudinta. Waxaad helaysaa sida caadiga ah qol kuu khaas ah, inta aad ku jirto qaybta.

Ku saabsan gelitaanka
Waxaad tagaysaa "Caruurta qalalka leh" (Qaybta neerfaha caruurta) ee Dr. Sells Vej 23, 4293 Dianalund - entrance D.
http://www.filadelfia.dk/patienter/spoergsmaal-svar/finde-vej

Markaad timaado, ilmahaaga waxaa la siinayaa qol, waxaa tusaya kalkaalie caafimaad, oo ka qaadaya wadahadalka dhigada qaybta. Kalkaaliyaha caafimaad wuxuu kaal hadlayaa baahida ilmaha, iyo sidii aad isaga caawin lahaydeen arimaha kale. Waxaa jirta kormeedrid isniin iyo talaado walba.

Xusuusnow inaad la timaado
- Daawada(ay ka mid tahay goojada indhaha iyo boomaatooyinka, iwm) iyagoo ku jira baakadahooda.
- Jadwalkaaga balamaha iyo kaarka talaalka
- Dharka iyo qalabka suuliga - dharka isboortiga, kabaha isboortiga oo midab khafiif ah ku leh gudaha iyo kabo lagu bedasho.
- Dharka hurdada iyo dacas.
- Qalabka lagu ciyaaro iyo buugag - ciyaaraha uu xiiseeyo, tusaale ahaan, boonbalada iyo baamsaha.

Haday lagama maarmaan tahay, soo qaado
- Moobaylka
- Raadiyo, CD iyo DVD
- Kombiyuutarka gacanta - qaybto waxay leedahay interneetka WIFI

Cunto
Hadduu imahu cuno cunto khaas ah, tubada laga quudiyo ama wax kaleba, waxaa haboon inaad soo qaadato cuntadiina maalmaha ugu horeeya. Waxa walbaa waad helaysaan, laakiin waxay qaadanysaa xoggaa maalmo ah. Waxaad wax ku karsan kartaa jikada waalidiinta, ee ku taala dabaqa koowaad, magaaladan waxaa ku yaala dukaamo fiican oo aad wax kasoo iibsan karto.

Waalidku waxay helayaan cunto firii ah, inta uu ilmahu ku jira qaybta.

Deganaashaha
Hal waalid ayaa la seexan kara ilmaha qaybta Adigaa ayaa mas'uul ka ah alaabadaada Qolalka oo dhan waxay leeyihiin khaanado wax la gashado. Dadka soo booqdo waxaa la geeyaa Crownell Hotel ee Sorø, kaasoo hadda loo isticmaala hoteelkaa bukaanka, waayo Hoteelka Filadelfia ee bukaanka waa la cusboonaysiinayaa. Degaanka waxaa laga dalban karaa via e-mailka Madogmoeder@filadelfia.dk

Warbixin muhiim ah
Booqashad waxay leedahay saacado go'an, laakiin waxaa la taxigelin la siiyayaa waqtiyada baaritaanka, nashaadaadka kale iyo guud ahaan nolosha guud ee qaybta. Waa fikrad wanaagsan inaad soo qaadato xafaayado, waayo waxaan haysana hal nooc kaliya oo xafaayad ah. "Caruuta qaba qalalka" qaybtu waxay leedahay meel qurux badan oo loogu talagaly in lagu ciyaaro iyo kormeer maalin walba. Siddaa daraadeed, waxaan kugu dhiiro gelinaynaa inaad soo qaadato dharka banaanka loola baxo.

Qaybtu waxay furan tahay 4 weekendi kasta, markaa bukaanku way aadan karaan guryahooda weekendiyada. Tani waxaad kala hadali kartaa kalkaaliyaha caafimaad markaad timaado. Marka laguu dirayo guriga ee waqtiyada weekendiga, Isbitaalka ayaa bixinaya kharshka safarka.

La talin
Halkaa waxaa jooga la taliye qaybta ka tirsan, kaasoo ku siinaya talo iyo hagida la xidhiidha sidaad oola xidhiidhi lahayd xafiisyada dawlada.

Waxaad ka akhrin kartaa halkan xuquuqdaa
http://www.filadelfia.dk/patienter/patientvejleder/vejledninger

Hagid
Inta aad ku jirto qaybta, waalidka iyo qaraabada kaleba waxay healyaan fursad ah, tusaale ahaan in loo sheego waxa ay xaq uleeyihiin Arag ogaysiiska ku dhegan qaybta dhexdeeda Haddi da'da ilamaha ay iskuul gaadhay, waxaa la siinayaa waxbarasho iskuul khaas ah. Waxay ku xiran tahay hadba habka loo dhigay qaybta Warbixin ku saabsan iskuulkal:
www.filadelfia.dk/formidling/boerneskolen

Siyaasada khamriga iyo sigaarka
Lama ogala khamriga iyo sigaarka qaybta dhexdeeda Waa laguu ogol yahay inaad dibada ku cabto sigaarka.

Gaadiidka
Filadelfia waxay leedahay gadiidka dadwaynaha oo aad u fiican Fadlan waxaad isticmaali karataa:
www.rejseplanen.dk

Gunada gaadiidka
Waxaad dalban kartaa in gaadiidka lagaa bixiyo, adoo la xiriiraya xafiiska gaadiidka gobolkaada. Xafiiska gaadiidka ayaa qiimaynaya haddii lagaa caawinayo xaga gaadiidka marka lagu dhigayo iyo marka aad ka baxaysaba.

Markaad ka baxdo ka dib
Waa lagula socodsiinayaa ka waalid ahaa marka ilmaha la bixinayo Haddii ay khasab tahay, in ilmahu uu ku xirnaado qaybta qalaka, isla markaas ayaa waxaa loo samaynayaa balan ay kula kulmayaan dhakhtarka iyo kalkaaliyaha caafimaad ee la socanaya xaaladiisa.